



HM Government

Grenfell
community

updates

Grenfell Tower community update: June 2026 - Somali / Af-Soomaali

Wargalinta bulshada Grenfell Tower: Juun 2026

Waxaan aqoonsanahay in Grenfell Tower uu leeyahay muhiimad shaqsiyeed oo qoto dheer dadka ay dhibaataadu sida weyn u saameysay, iyo in dhulku uu yahay mid barakaysan qoysaska.

Waxaan rabnaa inaan idinla socodsiino shaqadayada si aan si taxadar leh u dumino Tower.

Wargalintan waxaad wax badan ka ogaan kartaa:

- **Sanad guurada sagaal ee Grenfell Tower**
- **Tabeelooyinka wadnaha ku sawiran yahay ee Grenfell**
- **Codsiga Qorshaynta**
- **Kormeerka macluumaadka ku saabsan boodhka, gariirka iyo buuqa**
- **Taageerada caafimaadka iyo fayo-qabka**
- **Sida na loola soo xiriiro ama macluumaad dheeraad ah loo helo**

Waxaad ka arki kartaa wargalinadii hore halkan:

www.gov.uk/grenfell-community-updates

Sanad guurada sagaal ee Grenfell Tower

Bulshada Grenfell ayaa isu diyaarinaysa inay xusto sanad-guuradii sagaalaad ee musiibada 14 Juun. Waxaa naga go'an inaan taageerno qoysaska murugaysan, kuwa badbaaday iyo bulshada guud ahaan waqtigan. Si xushmad leh, shaqada Tower waxay joogsan doontaa laga bilaabo wakhtiga qadada Jimcaha 12 Juun dibna uma bilaaban doonto ilaa Talaadada 16 Juun. Waxaa jiri doona nalal dheeraad ah oo laga shido Munaaradda si loo xuso taariikhdan muhiimka ah. Shaqooyinka socda awgood, suurtoagal ma noqon doonto in la galo goobta Grenfell Tower inta lagu jiro xuska sanad-guurada sanadkan.

Tabeelooyinka wadnaha ku sawiran yahay ee Grenfell

Boorarka wadnaha ku sawiran yahay ee Grenfell ayaa laga taagi doonaa sanad-guuradii sagaalaad ee musiibada. Kadib sanad-guurada, waxaan bilaabi doonaa inaan si taxadar leh uga qaadno tabeelooyinka Munaaradda oo aan si badqab ah u kaydino. Waxaan aqoonsanahay in Tower-ku uu u ekaan doono mid ka duwan, iyo in calamaduhu ay macno u leeyihiin dad badan. Fadlan nagala soo xiriir cinwaanka iimaylka ee boga xiga ku yaala haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Codsiga Qorshaynta

Shaqada si taxaddar leh loogu burburinayo Grenfell Tower waxay bilaabatay sanadkii hore iyadoo la adeegsanayo waxa loo yaqaan Horumarinta La Ogol Yahay, kaas oo soconaya 12 bilood. Si loo dhameeyo shaqada, waxaan soo gudbinay codsi qorsheyn ah iyada oo loo marayo wadada qorsheynta ee Crown Development. Marka codsiga lagu daabaco onlaynka, waxaan kula wadaagi doonnaa xiriirkan wargalinada ku saabsan bulshada mustaqbalka.

Hawshan way ka duwan tahay codsiga qorshaynta ee dabayaaqada sanadkan ee Xuska Grenfell Tower, kaas oo la soo gudbin doono ka dib habka naqshadeynta ee ay bulshadu hogaaminayso oo ay maamusho Freehaus.

Kormeerka macluumaadka ku saabsan boodhka, gariirka iyo buuqa

Dowladdu waxay ka go'an tahay inay hubiso in dhammaan shaqada ka socota goobta Grenfell Tower loo fuliyo heerarka ugu sareeya. Badqabka iyo fayyo-qabka bulshada iyo dadka ka shaqeeya goobta ayaa ah mudnaantayada koowaad. Waxaa goobta ku yaal kormeerayaal ururinaya xog toos ah oo ku saabsan boodhka, gariirka, iyo buuqa. Xogta waxaa la daabacaa bil kasta. Si aad u aragto warbixinadii ugu dambeeyay, fadlan riix lifaaqyadan hoose:

[Warbixinta kormeerka busta ee 30 Maarso ilaa 3 Maayo 2026](#)

[Warbixinta kormeerka gariirka ee 30 Maarso ilaa 3 Maayo 2026](#)

[Warbixinta kormeerka buuqa ee 30 Maarso ilaa 3 Maayo 2026](#)

Hay'ada Caafimaadka ee UK (UKHSA) waxay sii wadi doontaa qiimaynta iyo la socodka tayada hawada ee agagaarka Grenfell Tower inta shaqadu socoto. Waxay soo saartaa warbixinadeeda bil kasta. Waxaad ka arki kartaa warbixintii ugu dambaysay halkan:

[Environmental monitoring following the Grenfell Tower fire - GOV.UK](#)

Taageerada caafimaadka iyo fayyo-qabka

Waan ognahay in xiligan sanadka uu si gaar ah ugu adkaan karo qoysaska. Haddii aad rabto inaad qof la hadasho, Adeega Caafimaadka iyo Fayyo-qabka ee Grenfell waa adeeg NHS oo lacag la'aan ah oo qarsoodi ah oo loogu talagalay caruurta iyo dadka waaweyn. Taageerada ayaa weli diyaar u ah qoysaska murugaysan, kuwa ka badbaaday, iyo dadka deegaanka ee ku nool bulshada dhexdeeda inta lagu jiro shaqada si taxadar leh loogu burburinayo Grenfell Tower. Haddii aad rabto inaad qof la hadasho, waxaad:

- Ka wici Adeega Caafimaadka Grenfell lambarka 020 8637 6279 (8 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo, maalin kasta).
- Ka wac Central and North West London NHS Foundation Trust's (CNWL) khadka talo bixinta ee hal meel oo laga heli karo xaaladaha degdegga ah,

ee ah:

0800 0234 650 (furan 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood todobaadkii).

- limaylka: grenfell.wellbeing@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnl.nhs.uk wixii macluumaad dheeraad ah.

Wixii macluumaad ah ee ugu dambeeyay ee ku saabsan adeegyada la heli karo, booqo www.grenfell.nhs.uk

Sida na loola soo xiriirno ama macluumaad dheeraad ah loo helo

Waxaan rabnaa inaan macluumaadka kula wadaagno si ay kuu caawiso. Waxaan sii wadi doonaa inaan si joogto ah ula wadaagno wargalino iyo macluumaadka:

www.gov.uk/grenfell-community-updates

Fadlan iimayl noogu soo dir: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk adiga oo u diraya:

- Balanso inaad nala hadasho, ama qandaraaslaha ugu weyn ee goobta Grenfell Tower, DCUK.
- Na waydii su'aalo kasta oo aad qabtid ama nala wadaag walaac kasta oo ku saabsan shaqada si aad si taxaddar leh u burburiso Tower.
- Naga codso inaan si toos ah kuugu soo dirno wargalinada joogtada ah ee aan soo dirno iimayl ahaan.
- Nala wadaag fikradahaaga ku saabsan sida aan kula soo xiriirno iyo sida aan kula macaamilno, haddii aad jeclaan lahayd. Waxaan soo dhawaynaynaa aragtidaada.

Wixii wararkii ugu dambeeyay ee Grenfell Tower, iyo si aad isu diiwaangaliso ogaysiisyada iimaylka, fadlan aad: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee koodhka QR.

